Isbeddellada Guud ee ugu Muhiimsan

Kalabar dadka Soomaaliyeed, 3.8 milyan oo qof, ayaa u baahan taageero nolol-raadsi iyo mid bani'aadamnimo. Waxaana tan iyo bishii Jannaayo oo ay ahaayeen 3.2 milyan ku kordhey 18%, sida lagu ogaadey qiimeyntii xilli-roobaadka gu'ga ka dambeeya ee bilaha Abriil – Juunyo ee ay sameysay Waaxda Lafagurka Haqab-beelka Cuntada iyo Nafaqeynta (FSNAU). War-saxaafadeed ay soo saartey 24kii Agoosto, ayaa ay FSNAU kaga digtey in xaaladda bani'aadamnimadu ay ka sii dari karto haddii dagaalladu ay sidan ku sii socdaan. Ilaa 75 boqolkiiba dadka gargaarka u baahan waxa ay ku sugan yihiin Koonfurta/Bartamaha Soomaaliya, halkaas oo ay dagaallada badidoodu ka socdaan, kuwaas oo lagu weynayo nolol iyo nolol-raadsi oo hortaaganna gaarsiinta gargaarka bani'aadamnimada.

Xuddunta dhibaatooyinka abaartu waa gobollada Mudug, Galgaduud, Hiiraan iyo Bakool waxaana sababey abaar dhacdey shan xilli oo iskuxiga. Goobahan, ayaa 75 boqolkiiba lagu tilmaamey in ay dadku ku jiraan Xaalad Bani'aadamnimo oo Degdeg ah. Waxaa sidoo kale jirta in xaaladda cuntada iyo nafaqada ee waqooyigu ay aad uga sii dareyso taasna waxaa sababey abaarta muuqata ka dib markii 2-3 xilli oo isku xiga ay da'een roob k yar intii caadiga ahayd. Dad lagu qiyaasey 255,000 oo qof ayaa la aqoonsaday in ay haystaan Dhibaatooyin Cunto iyo kuwo Nolol-raadsi, halka 25,000 oo kale ay ku jiraan Xaalad Bani'aadamnimo oo Degdeg ah.

Heerarka nafaqo-xumada ee dhowr qaybood oo ka mid ah dalka ayaa sii xumaadey tan iyo bishii Jannaayo, waqtigan mid (1) ka mid ah 5tii carruur ahiba ayaa ay haysaa nafaqo-xumo, iyada oo mid (1) ka mid 20-kiiba ay hayso nafaqo-xumo ba'an. Sanadkan horraantiisii tirooyinku waxa ay ahaayeen mid (1) ka mid ah lixdii carruur ahba ay haysay nafaqo-xumo. Carruur lagu qiyaasey 285,000 oo ay da'doodu ka yar tahay 5 sano jir ayaa ay haysaa nafaqo-xumo ba'an, kuwaas oo 70,000 oo ka mid ah ay hayso nafaqo-xumo aad u ba'an.

Dalaggii Xilliga Gu'ga ee 2009ka ka soo go'ay koonfurta dalka ayaa ahaa mid caadi ah, gaar ahaan gobollada Baay, Jubbooyinka iyo Shabeellooyinka, haseyeeshee dheefta dalagga soo go'ay ayaa aan la fileynin in ay gaarto gobollada ay abaartu saameysey ee Hiiraan, Galgaduud, Mudug, Nugaal, Sool, Sanaag iyo Togdheer. Digniin Haqab-beelka Cuntada ku aaddan oo 27kii Agoosto ay soo saartey Shabakadda Nidaamyada Ka Sii Digista Abaarta, ayaa sheegtey in Dadka Gudaha Ku Barokacay iyo gobollada la deriska ah koonfurta ay qaadan doonaan dalagga dheeriga ah ee soo go'ay.

Rayidka ayaa weli ah kuwa ay dhibtu ka soo gaarto dagaalka culus ee Muqdisho. Toddobaadka dhexdiisa, ugu yaraan 50 qof ayaa lagu diley iyada oo dersinno kale lagu dhaawacay iskudhacyo u dhexeeyey ciidamada dowladda iyo muqaawamada. UNHCR ayaa sheegtey in ugu yaraan 87,000 oo qof ay ku barokaceen Soomaaliya ilaa 1dii Luulyo; iyada oo qiyaastii 4,500 oo qof ay barokaceen toddobaadka dhexdiisa. 87,000 ee qof ee barokacay, ayaa 25,000 waxa ay ku qaxeen goobo isla magaalada Muqdisho ah oo 47,000 kalena waxa ay ka baxeen magaalada (21,000 waxa ay aadeen Afgooye). Kooxaha hubeysan ee Muqdisho ayaa sidoo kale beegsanaya NGO-yada degaanka; 22kii Agoosto, laba xafiis ayaa la bililiqeystey.

Waxqabadka

Puntland, ayaa WFP iyo la-hawlgalayaasheedu ay toddobaadkii la soo dhaafey waxa ay 7,700 oo qof ku gaarsiiyeen cunto hoos imaneysey barnaamijka quudinta dheeriga ah, dadkaas oo ay ka mid ahaayeen 5,000 carruur ku nool Burtinle ah iyo 458 oo hoos imanayey barnaamijka cunto-shaqo-ku-beddeleshada ee Lafagorayo. Gobollada Togdheer, Sool, Sanaag iyo Awdal ee Somaliland, ayaa 50,000 oo ka-faa'iideystayaal kale ah ay ku heleen 814 metrik ton oo badeecooyin cunto kala duwan ah oo hoos imanayeyey barnaamijyada quudinta dheeriga ah ee la beegsado, Xarumaha Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka, quudinta hay'adaha iyo cunto-qaybinta guud. Cunto-qaybin kale oo hoos imaneysey barnaaamijyada quudinta dheeriga ah ayaa sidoo kale ka dhacdey gobolka Jubbada Hoose taas oo lagu gaarey ilaa 4,000 oo ka-faa'iideystayaal ah. Ilaa 1,700 oo ka-qaybgalayaasha cunto-shaqo-ku-beddelashada ah ayaa 174 metrik ton oo cunto kala duwan ah ku heleen magaalada Saakow ee gobolka Jubbada Dhexe.

UNICEF iyo la-hawlgalaheeda degaanka ayaa bilaabey in UNIMIX (oo ah cunto borotiintu ku badan tahay oo mushaalli oo kale ah oo laguna xoojiyey fitamiinno iyo macaadin) ay ka qaybiyaan degmada Afgooye, oo ay ku jiraan xerooyinka Dadka Gudaha ku Barokacay ee ku yaalla waddada Afgooye iyaga oo gaarey ilaa 65,000 oo carruur ay da'doodu u dhaxayso 6 bilood ilaa 3 sano ah.

25kii Agoosto, hay'adda *Danish Refugee Council* ayaa qalab dhisme u qaybisey 180 qoys oo dab kacay uu waxyeeleeyey si ay awood ugu siiso in ay dib u dhistaan guryahoodii magaalada Boosaaso ee Puntland. Isla waqtigaas, UNHCR ayaa 180 agabka aan cuntada ahayn ah – oo ay ku jiraan baco, 2 joodari, 2 buste, maacuun iyo jiirgaan u qaybiyey qoysaskaas.

Waxqabadyada biyo-dhaaminta oo ay ka faa'iideysanayaan 17,000 oo dadka ay abaartu saameysey ah ayaa ka socda gobollada Sool, Nugaal, iyo Sanaag iyo Karkaar, taas oo uu taageerey Sanduuqa Waxqabadka Bani'aadamnimada.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org.
Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org